# Hennepin County
# Domestic Violence Court
# (Maxkamadda DAGAALKA DHEX MARA QOYSKA)

**Hennepin County Public Safety Facility (Dhismaha Nabadgelyada daweynaha ee Degmada Hennepin)**
**401 Fourth Avenue South - Courtroom 143**
**Minneapolis, MN 55415**

**Waxaad Samaynayso Marka aad Timaado**

- Haddii aad u baahantahay turjubaan, ogaysii xoghaynta maxkamadda markaad soo gasho qolka maxkamadda.
- Eedaysanayaasha doonaaya in loo qabto qareen lacag la'aan ah (public defender) waa in ay markay yimaadaanba la hadlaan sarkaalka tijaabada ( probation officer). Haddii kale, Eedaysanayaashu waa in ay iska fadhiyaan illaa magacooda uu u yeero xoghaynta maxkamaddu.
- Dhibanayaashu waa in ay la hadlaan ku xigeenka shariif-ka (Askari ka tirsan askarta maxkamadda) haddii ay rabaan meel ay fariistaan oo ammaan ah.

**Haddii aad qabto su'aal ku saabsan balanta maxkamadda?**
Soo Maxkamadda Degmada Hennepin oo lagala soo xiriiri karo (612) 596-825

***Maxkamadda Dhagaysata dagaalka dhex mara Qoyska*** Maxakamadda dagaalka dhex mara ayaa qoyska ayaa dhegaysata dembiyada gaboodfalka ama xadgudubka qoyska dhex mara ee ka dhaca Magaalada Minneapolis ahna dembiyada kuwa fudud iyo kuwa dhexe (misdemeanor and gross misdemeanor). Maxkamaddu waxay shaqaysaa laga bilaabo 8:30 subaxnimo illaa 4:30 galabnimo, Isniin illaa Jimce.

***Dhegaysiga Hor Keenid Maxkamadda (Arraignment Hearing)*** Tani waa marka ugu horaysay ee eedaysanaha maxkamad la hor keeno. Dhegaysiyadaan waxaa loo qabtaa in dhawr arrimood oo muhiim ah wax laga qabto:

- Maxkamaddu waa in ay go'aan ka gaartaa damiinka iyo shuruudaha lagu siidaynaayo, hadday jiraan, sida in eedaysanuhu uusan wax xiriir ah la yeelan karin dhibanaha ama uusan khamri cabi karo.
- Haddii eedaysanuhu xaq u yeesho, waxaa loo qabanaayaa qareen lacag la'aan ah (public defender).
- Wixii warbixin ku saabsan dhibanaha maxkamadda ayaa loo gudbinayaa, sida in dhibanuhu rabo in uu xiriir la yeesho eedaysanaha inta kiisku socdo iyo inkale.
- Laba todobaad gudahood ayaa balan la qabanayaa ah dhegaysiga gogol-xaarka maxkamadda (pre-trial appearance).

***Dhegaysiga Gogol-xaarka Maxkamadda (Pretrial Hearing)*** *Dhegaysiyadaan waxaa la qabtaa* 8:30 subaxnimo. Tani caadi ahaan waa marka labaad oo la hor imanayo garsoore. Dhegaysigaan waxaa ka mid ah wada hadal dhexmaraaya Qareenka Magaalada (Xeer Ilaaliye) iyo qareenka difaaca ama eedaysanaha haddii aanu qareen lahayn. Caadi ahaan qareenka magaalada ayaa soo jeediya heshiis dacwadda lagu soo af-jaraayo oo ah in uu eedaysanuhu dambiga qirto. Haddii eedaysane uu doonayo in uu kiiska soo af-jaro markaas, isaga/iyada waxaa uu buuxinayaa codsi qoraal ah kaas oo ay ku qoran tahay xuquuqda uu eedaysane ka tanaasulaayo iyo qodobda xukunka/ciqaabta. Markaa ka dib baa kiiska la hor keenaa garsoore oo eedaysanuhu dambiga ka hor qiranayo. Kiiska isla markaaba waxaa loo gudbiyaa koox baaris ku samaysa oo garsooraha kala taliya waxa ciqaabta eedaysanuhu noqonayso. Warbixinadaan waxaa loo soo celiyaa garsooraha galabtii. Haddii garsooruhu qirashada ansaxiyo, ka dib markii uu arkay warbixinta baaritaankii la sameeyay, kiiska waa la wacayaa oo

la diiwaan gelinayaa.  Ku dhowaad dhamaan eedaysanayaasha oo dhan waxaa la xukumaa maalinta ay wax qirtaan galabteeda.  Badanaaba edaysanayaashu waxay xukunka ka dib la kulmaan sarkaalka tijaabada si ay ula dhigtaan balama dambe.

***Dacwad Qaadis (Trial)***  Eedaysanayaasha oo dhammi waxay xaq ku leeyihiin in dacwaddooda ay dhegaystaan xeer beegti (jury).  Haddii dhinacyadu aysan heshiis ku gaarin dhegaysiga googol-xaarka maxkamadda, kiiska waxaa loo balaminaayaa in dacwadda la qaado oo uu dhegaysto garsoore ama xeer beegayaal

***Dhegaysi Ka-noqosho (Revocation Hearing)*** Badanaaba eedaysanayaasha loogama baahna in ay wada gutaan mudada xarigga oo dhan, taas oo ah qayb ka mid ah xukunkooda/ciqaabtooda.  Eedaysanayaasha waxaa lagu amraa in ay si buuxda u buuxiyaan shuruudaha tijaabada taas oo qayb ka ah mudadii ay xirnaan lahaayeen oo  dib loo dhigayo lana eegayo hab dhaqankedeysanaha.  Shuruudahaan waxaa ka mid noqon kara daawayn khasab ah, wax xiriir ah in uusan/ayasan la yeeyan dhibanaha, waa in aysan jirin dembiyo oo uu la yimaado oo hor leh, in loo baahan yahay in edaysanah xiriir la yeeshi saraakiisha maxkamadda ee ay tahay inuu wargeliyo hadba meesha uu joogo iyo cinwaankiisa ugu dambeeyay, iwm. Markii uu qof tijaabo loo siidaayay ku xadgudbo shuruudahan mid ka mid ah garsooruhu wuxuu saxiixi karaa amar lagu soo xirayo.  Marka eedaysane la soo qabto, waxaa la qabanayaa dhegaysi uu joogo garsooruhu.  Garsooruhu wuxuu ku ridi karaa qaar ama dhamaan xarigii dib loogu dhigay si loo eego hab dhaqankiisa, isagoo isla markaa dib ugu celinaya tijaabadii ama ka joojinaaya tijaabo u deyntii.

***Warbixin ku socota Dhibanayaasha***

Xeerka Minnesota wuxuu qorayaa, dhibanayaashu waxay fursad u helayaan in ay maxkamadda ka hor sheegaan sida ay u arkaan in uu yahay dagaalka dhexx maray qoyska.  Waxay sidaan samayn karaan iyaga oo uu u sheegayo garsooraha ama qof ay wakiisheen.  Dhibanayaasha waa in lala socodsiiyaa marka eedaysanaha xarigga laga siidaayo iyo meesha kiiska dembigu maraayo.  Wakaaladaha hoos ku taxan/qoran ayaa dhibanayaasha ka caawinaan maxkamadda kiisaskaan oo kale.

- **Isku Xiraha marqaatiga iyo dhibanaha**  oo ka socda magaalada Minneapolis – Wuxuu Qareenak Magaalada u gudbiyaa wixii dhibanuhu u sheego. Telefoonkooda waa:  (612) 673-2467.
- **Xarunta u adeegta dadka dhibaatadu ka soo gaartay dagaalka dhex mara qoyska** Waxay xarun u adeegta dhibanayaasha.  DASC waxay soo saartaa Amarro lagu ilaalinaayo, waxaana laga helaa dad dadka u hadla, askar, kuwa tijaabada, iyo adeegyada lagu ilaaliyo ilmaha waxayna ku xirtaa meela kale oo adeegyo laga heli karo sida hay'ado gaar ah dhaqanno.  Teleefoon: (612) 348-5073.
- **Mashruuca xagudubka qoyska** – Waxay siisaa dhibanaha adeegyo ay jaaliyaddu u samaynayso dhibanaha Iyo qoyskiisa/qoyskeeda, waxaa ka mid ah ammaanka oo qorshe loo sameeyo, arrimo lagu ilaalinaayo ilmaha, xaq u yeelashada iyo u yeelasha la'aanta mucaawinada, adeegyada hoyga, iyo amarada ilaalinta.  Telefoon:  (612) 673-3526.

***Warbixin ku socota Eedaysanayaasha***

- **Siduu sharci ahaan isu difaaci lahaa eedaysanuhu**
  Eedaysanayaashu waxay ka codsan karaan qareeno lacag la'aaan ah Xafiiska Qareenada Dadweynaha. Si ay xaq ugu yeeshaan, waa in aysan awood u lahayn in ay qabsadaan qareen lacag ah.  Codsiyada adeeggan subax walba waxaa qabta shaqaalaha maxamadda ka hor intaan la qaban dhegaysiga horkeenidda maxkamadda iyo dhegaysiga googol-xaarka maxkamadda.  Eedaysanayaashu waa in ay  codsadaan in loo balan sameeyo balan qareen loogu qabanyo.  Eedaysanayaashu way qabsan karaan qareeno lacag ah, ama ma codsan karaan qareen lacag la'aan ah, waa xaalad uu edeysanuhu isaga is difaacayo.

- **Xaqqa uu qofku u leeyahay  in wakhtiga sharciga ah gudihiisa dacwaddiisa lagu qaada** - Eedaysanayaasha u xiran eedaymo dembiyo fudud waxay xaq u leeyhiin in dacwadooda la qaado 10 maalmood gudaheed;  Eedaysanayaasha aan xirnaynse waxay xaq u leeyihiin in dacwadooda lagu qaado 60 maalmood gudahood.  Eedaysanayaashu way ka tanaasuli karaan xaqqa ay u leeyihiin in dacwadooda dhakhso loo qaado.

***Adeegyada Turjubaanka***

- Mar kasta oo talaaba sharci ah la qaadayo waa in maxkamaddu turjubaan u keentaa eedaysanayaasha iyo marqaatiyadaba.
- Dhibanayaashu adeegyada waxay ka heli karaan DASC, DAP iyo Xafiiska Qareenka Magaalada.

***Shaqaalaha Qolka Maxkamadda*** – Shaqaale ka kala socda hay'ado kala duwan ayaa hawlwadeeno ka ah Maxakamadda degmada ee Hennepin ee dhagaysata dacwadaha dagaalka dex mara qoyska waana sidan soo socota:

***"No Contact" Orders (Amarada ah "Uusan eedaysanuhu la xiriir karin dhibanaha")*** – Amarada ah wax xiriir ah ha la yeelan waa amaro uu garsoore bixiyo.  Heshiis dhinacyada dhexmaray waxba kama bedeli karo waana in mar walba loo hogaansamaa.  Amarkan **Waxaa ka mid ah laga bixiyaa Dhismaha nabadgelyada Dadweynaha maalinta la dhagaysanayo dacwadda.** ku Xadgudub amarkan wuxuu eedaysanaha u keeni karaa in la xiro.  Amarkan cid aan garsoore ahayni ma bedeli karto.  Haddii dhibanuhu rabo in uu ka codsado maxkamadda si loo bedelo amarka ah wax xiriir ah halayeelan ka hor inta aan xukunku/ciqaabtu dhicin, isagu/iyadu waa in ay la xiriirtaa Qareenka Degmada oo taleefoonkiisu yahay: (612) 673-2010.  Qofkii donaya in uu codsado in la bedelo amar maxkamadeed ka dib markii xukunku dhacay waa in uu la xiriiraa sarkaalka tijaabada la socda ee eedaysanaha.

***Eedaysanaha "Maxkamadda Iman waaya"*** –Haddii Eedaysanaha maxkamadda iman waayo waxay keeni kartaa in garsooruhu amro in la soo xiro.

| | | |
|---|---|---|
| **Garsoore** | Wuxuu ka gudoomiyaa mas'uulna ka yahay waxa ka dhacaaya qolka maxkamadda. | (612) 348-6000 |
| **Shariif ku-Xigeenka** | Wuxuu mas'uul ka yahay amaanka iyo nabadda qolka maxkamadda | (612) 596-8300 |
| **Qareenka Magaalada** | Wuxuu go'aan ka gaaraa eedaynta iyo oogidda kiiska. | (612) 673-2010 |
| **Qareen Difaaca Dadweynaha** | Eedaysanayaasha xaqqa u leh wuxuu lacag la'aan kaga difaacaa dembiga lagu so oogay (waa qofka lagu eedeeyay danbiga laga hadlaayo). | (612) 348-7530 |
| **Xogahynta Maxkamadda** | Maamulayaasha, jadwalada, iyo diiwaanada waxa maxkamadda ka dhacaaya. | (612) 596-8250 |
| **Sarkaalka Tijaabada – la socoshada dambiilayaasha** | Waraysi la yeeshaa eedaysanayaasha, kala taliyaa eedaysanayaasha shuraadaha laga rabo in ay u hogaansamaan iyo in uu kormeero sida garsooruhu go'aamiyay. | (612) 596-8200 |
| **U hadla Jaaliyadda** | Ku caawinaa dhibanaha waxa ka dhacaaya maxkamadda, sidii ammaanka loo qorshayn lahaa iyo arrimo kale. Dhibanayaashu waxay kala xiriiri karaan wixii su'aalo ay qabaan. | (612) 673-3526 |

3/2002;v2
Call (612) 348-8854 to order additional brochures